

Farriinta Kormeeraha Guud
Xusuusin, Dugsiyada ayaa Xidhnaan doona inta ka dhiman Sanad Dugsiyeedka
20 ka-Abriil, 2020

Salaan Bulshada Dugsiyada Magaalada Columbus,

Maanta, Guddoomiyaha Gobolka Mike DeWine wuxuu shaaca ka qaaday in dhammaan dugsiyada gobolka Ohio ay sii xirnaan doonaan illaa dhamaadka sanad dugsiyeedka 2019-2020 si ay gacan uga geystaan gaabinta cudur faafiyaha COVID-19.

Runtii tani maahan sidii aan filaynay inaan dhameystirno sannad-dugsiyeedka markii aan furnay bishii Agoosto ee la soo dhaafay. Laakiin tani waa xaqiiqo cusub oo degmooyinka dalka oo dhan ay hadda wajahayaan, waana inaan la qabsanaa gaadhsiinta khibrado waxbarasho tayo leh ardaydena si horey loogu socdo.

Waxaan hubaa in badan oo idinka mid ah ay dareemayaan sida aniga oo kale, rabitaanka kusoo laabashada sidii caadiga ahayd. Anagu garan mayno waxa mustaqbalku noqon doono iyo waxa ardaydeena iyo shaqaalaheena, waana ogahay in hubanti la'aantaasi ay walaac ku abuuri karto. Sida aan u hogaamineyno noloshan cusub ee fog, ma caawin karo laakiin waxaan u-xiisi doonaa inaan arko ardaydeena, shaqaalaheena iyo dhismayaasha dugsiyadeena. Dugsiyadeenu waa hoy nabdoon iyo hoyga labaad ee loogu talagalay in badan oo ah ardaydeena, mana sugi karno ilaa maalinta aan awoodno inaan ku soo dhaweyno mar kale gudaha dugsiyada.

Ilaa wakhtigaa laga gaadho, in kastoo, Dugsiyada Magaalada Columbus ay ka go'an tahay la shaqeynta iyo waxbarida ardaydeena iyada oo loo sii marayo Akademiya Internetka ee CCS, taas oo noqon doona bartilmaameedkeena waxbarasho ilaa iyo dhamaadka sanad dugsiyeedka. Dhismooyinka dugsiyadeena waxaa laga yaabaa in la xiro, laakiin waxbarashadu horey usii socon doontaa.

Macalimiinta waxay u xilsaaranyihiin casharada looga baahan yahay ardaydooda Akademiya internetka tooska ah. Qaar badan oo ka mid ah ardadeena fasalada 12-naad, koorsadan khadka tooska ah waa muhiim si loo buuxiyo shuruudaha qalin jabinta. Hadaad arday tahay aan wali galin ama aan lalahayn xiriirka khadka waxbarashada macalinka, Waxaan si aad ah kuugu dhiirigelinayaa inaad sidaan samayso toddobaadkan.

Warkii maanta ka soo baxay Gudoomiyaha, runtii maahan wax la yaab ah in la maqlo, laakiin si kastaba ha ahaatee wuxuu ahaa niyad jab. Waxaan si gaar ah ooga niyad jabsanahay ardayda fasalada 12-naad kuwaas oo ka maqnaandoona waqtiyo muhiim u ah noloshooda. Waxaan sameynay koox qabata hawsha Sare si looga fikiro siyaabo aan ugu

dabaal-degno sida ugu habboon oo sharaf leh fasalsda 12-naad usbuucyada soo socda. In kasta oo fikradahan aysan waligood beddeli karin xafladaha dhaqanka iyo waaya-aragnimada, Waxaan ku rajo weynahay awooda inaan sameyn karno una ogolaan karno fasalada 12-naad waxoogaa dareen dabaaldeg ah iyo horumar.

Waan ognahay in ardaydeenna, qoysaskooda, iyo bulshada balaaran ay wajahayaan waqtiyo aan la hubin oo aan hore loo arag. Waxaan rabnaa inaan halkaan joogno si aan u caawino oo aan u taageerno si kasta oo aan kari karno. Fadlan booqo [StaySafeCCS.org](https://www.staysafeccs.org) si aad u hesho macluumaad fara badan iyo ilo ay heli karaan qoysaskayaga. Dhamaan ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha fadlan ahaada kuwo bedqaba!

Si daacad ah,



Talisa Dixon

Kormeeraha Guud / Madaxa Fulinta, Dugsiyada Magaalada Columbus
(Superintendent/CEO, Columbus City Schools)